

Daryeelka aasaasiga ah waxaa badanaa loo tix-geliyaa sida 'albaabka hore' ee adeegga daryeelka caafimaadka, ina la siiyo talo bukaannada ee daryeelka caafimaadka, daaweynta iyo maareynta bulshadooda dhexdeeda.

Daryeelka aasaasiga waxaa ka mid ah:

- Farmashiyayaasha bulshada
- Dhakhaatiirta ilkaha
- Dhakhaatiirta indhaha
- Qaabilaada xarunta Dhaqtarka
- Kalkaaliyayaasha Dhaqtarka
- Dhakhaatiirta daaweynta jirka
- Saraakiisha Xiriirinta Caafimaadka Maskaxda
- Xarumaha Daryeelka Aasaasiga Degdegga ah

Xubin kasta oo ka mid ah kooxda daryeelka aasaasiga ah waxay leedahay xirfado iyo khibrad meelo kala duwan, taasoo awood kuu siinaysa inaad hesho taageerada saxda ah, xirfadlaha daryeelka caafimaadka saxda ah, markii ugu horeysay.

Si aad u heshid adeegyada daryeelka aasaasiga ah ee NHS ee deegaankaaga, booqo cavuhb.nhs.wales/primary-care-services ama iskaan saar QR koodka hoose.



Markaad aragto qofka saxda ah, goobta saxda ah, marka ugu horeysa, waxaad heli doontaa daawaynta ugu habboon baahiyahaaga daryeel caafimaad.

Haddii aadan hubin xubinta kooxda daryeelka aasaasiga ah waa qofka ugu wanaagsan ee aad aragto ee quseeya baahiyahaaga, fadlan booqo cavuhb.nhs.wales/primary-care-services.

Waxa kale oo aad ka heli kartaa adeegyadayada daryeelka aasaasiga ah ee NHS ee deegaankaaga oo wata agabka raadinta ee anfacaya.

#WeArePrimaryCare



NHS 111 Wales

Haddii aadan hubin calaamadahaaga iyo taageerada aad u baahan tahay, waxaad booqan kartaa NHS 111 Wales onlayn ama wac 111 lacag la'aan mobil ama taleefan.



Kooxdaada daryeelka aasaasiga ah

Kooxdaada daryeelka caafimaadka ee bulshada, oo inta badan loo yaqaan sida kooxdaada Daryeelka Aasaasiga ah, waa qaybta hore ee wicitaanka loogu tala galay baahiyaha daryeelka caafimaadka ee bulshadaada.





Farmashiyaha bulshada

Farmashiyaha xaafadaada waxay sameeyaan wax ka badan ee bixinta daawooyinka. Waxay sidoo kale ku siin karaan talo ku saabsan xanuunada fudud iyo daawooyinka.

Farmashiyeyaasha bulshada qaarkood waxay awood u leeyihiin inay bixiyaan daawaynta NHS oo bilaash ah xanuunada caadiga ah oo ayna daawooyin qoraan.



Dhakhtarka ilkaha

Dhakhtarka ilkuhu wuxuu ku caawin karaa haddii aad leedahay ilko/goos xanuun, xanuun ama dhiig cirida, dhibaataada goos dambeed, dareenka gooska/ilkaha ama noocyada kale ee xanuunka wejiga.



Dhakhtarka indhaha

Sidoo kale loo yaqaanno dhakhaatiirta ee high-sare, dhakhtarka indhaha ayaa ku siin kara talo iyo taageero baahiyaha caafimaadka indhaha, sida dhibaatooyinka araggaaga, xanuunka ishaada ama dhaawaca.



GP-gaaga/ Dhaqtarkaaga

Marka aad la xiriirto Dhaqtarkaaga, waxaad marka hore la hadlaysaa qaabilaada. Waxaa loo tababaray inay weydiiyaan su'aalo si xafidsan ah si ay u qiimeeyaan baahiyahaaga oo ay u hubiyaan inaad hesho xirfadlaha daryeelka caafimaadka saxda ah, marka hore.

Gudaha xarunta Dhaqtarkaaga waxaa ku dhex jiraaan koox xirfadlayaal caafimaad ah oo ku takhasusay qaybo kala duwan si ay kuu siiyaan talada iyo daaweynta ugu fiican.



Kalkaalisada ka howlgasha

Waxaad booqan doontaa Kalkaalisadaada kalkaalisada ka howlgasha ee Guud si aad u hesho daryeelka dhaawaca, talada iyo dib u eegista ka hortagga uurka, tallaalada, la socodka dhiigga iyo dib u eegista xanuunada daba-dheeraada, sida neefta iyo macaanka.



Daaweeye jireed

Takhtarka jimicsiga jirka ayaa ku siin kara talo iyo daaweyn haddii aad qabtid xanuunada kalagoosyada ama murqo.



Sarkaalka Xiriirinta Caafimaadka Maskaxda

Saraakiisha xiriirka caafimaadka dhimirka waxay ka shaqeeyaan gudaha xarunta dhaqtarkaaga si ay u taageeraan bukaanada baahidooda ee caafimaadka dhimirka.



Xarunta daryeelka aasaasiga ah ee degdega ah

Waxa laga yaabaa in qaabilaada dhaqtarkaaga uu kuu gudbiyo xarunta daryeelka aasaasiga ah ee degdega.

Xarumahani waxay soo bandhigayaan karti dheeraad ah oo lagu taageerayo howlgalka dhaqtarkaaga si loo hubiyo inaad heli karto daryeel degdeg ah markaad u baahan tahay.



Dhaqtarkaaga

Takhtarkaaga guud waxa uu ku siin karaa talo iyo daaweyn xanuuno kala duwan. Tani waxay badanaa noqon doontaa bukaanada kuwa ugu nugul, adag oo aad u xanuunsan.

